# Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha

## Ujeedada

Xeerka Kaalmada Dhaqaaluhu wuxuu qeexayaa adeegyada kaalmada Dhaqaalaha iyo talo bixinta Dhaqaalaha ee la siin karo bukaannada u qalma ee Shirkada Isbitaalka d/b/a Boston Children's ("Isbitaalka") iyo mu'asasooyinks Laxidhiidha isbitaalka ee Dhakhaatiirta ("Urururada") kuwaasoo adeegyo ku hela xarumaha Isbitaalka ama xarumaha Ururka ee nidaamyada taageerada maamulka iyo shaqaalaha uu bixiyo Isbitaalku, iyo sidoo kale nidaamka raadinta kaalmada dhaqaale iyo adeegyada talo Bixinta Dhaqaalaha. Liiska farsamooyinka Isbitaalka iyo mu'asasadaha, goobaha iyo xarumaha kale ee baxsha Adeegyada Xaaladda deg dega ah iyo Adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah kuwaasoo Kaalmada dhaqaale lagu heli karo Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha sida lagu qeexay Xeerkaan Kaalmada Dhaqaalaha. Siyaasaddani ma dabakhayso Boston Children's Health Solutions, Rx, LLC d/b/a Boston Children's Pharmacy ama dawooyin kasta oo uu qaybiyey Boston Children's Pharmacy.

## Bayaannada Xeerka

1. Hospital iyo Foundations waxaa ka go'an inay u noqdaan ilo kheyraad ahaaneed ilmaha u baahan daryeelka ee dhakhaatiirta xarumaha caafimaadka Hospital ama Foundation clinicians.

2. Xeerkani wuxuu khuseeyaa Adeegyada Xaaladaha Degdegga ah iyo Adeegyada kale ee Caafimaad ahaan lagama maarmaanka u ah (sida hoos lagu qeexay) ee ay bixiyaan Hospital iyo Foundations; waa shardi in kuwan soo socdaa laga saaray xeerka, iyo inaan kaalmada maaliyadeed loo heli karin kuwan soo socda, haddii loo arko inay yihiin Adeegyada Xaaladaha Degdegga ah ama Adeegyada kale ee Caafimaad ahaan lagama maarmaanka u ah: (a) Qaar kamid ah daawaynta/alaabooyinka hidda-sidaha, dawooyinka iyo daawaynta kale (Tusaale ahaan, Zolgensma, Kymriah, Luxterna, Zynteglo, Skysona iyo kuwa kale ee daawaynta hidda-sidaha/alaabta, daawooyinka iyo daawaynta sida uu Hospital u go'aamiyo), iyo (b) habraaca qurxinta ee doorto. Hospital wuxuu kala shaqayn doonaa bukaanada iyo qoysaskooda inay uga caawiyaan dadaalkooda sidii kaalmo dhaqaale uga heli lahaayeen dawooyinka, culuumta saynis ahaaneed, cilmiga noolaha iyo shirkadaha kale ee bixiya wax kasta oo daawaynta/alaabta hidda-sidaha ah, daawooyinka iyo daaweynaha kale ee caafimaad ahaan laga maarmaanka u ah lagana saaray laga soo bilaabo xeerka Kaalmada Maaliyadda.

© Boston Children's Hospital, 2022 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin

3. Isbitaalku wuxuu Adeegyada xaaladda deg dega ah siin doonaa dhammaan bukaannada, si bilaa takoor ah ama ayadoon laga eegin in bukaanku uu xaq u yeelan karo kaalmada uu ku helo Xeerkan Kaalmada Dhaqaalaha.  Isbitaalku wuxuu mamnuucayaa talaabooyin kasta kuwaasoo ka hor istaagaaya dadka inay dalbadaan Dayeelka caafimaad ee Degdega ah, sida in laga dalbado bukaanada yaala Waaxda Xaalada degdega ah inay baxshaan qarashka kahor intaan laga daawayn Xaaladaha Caafimaad ee degdega ah ama ogolaanshaha talaabooyinka lacag qaadista kuwaasoo carqaladaynaaya bixinta daryeelka, ayadoon la kala saarin xaaladaha, Adeegyada Degdega ah.

4. Isbitaalka iyo Mus'asadaha, ayagoo adeegsanaaya waaxda Talo bixinta dhaqaale ee Isbitaalka, waxay ka caawin doonaan bukaanada/dadka bixinaaya qarashka bukaanka (sida hoos lagu qeexay) oo wada hanaanka codsiyada barnaamijyada dowladda ee la heli karo ama barnaamijyada Isbitaalka, oo ay ku jiraan caymisyada MassHealth, barnaamijyada kale ee Medicaid, ConnectorCare iyo Health Safety Net, markay suuragalayso.

5. Isbitaalka iyo Mus'asadaha waxay Kaalmada dhaqaale siin karaan bukaanada buuxiya shardiga u qalmida ee lagu qeexay Xeerkan Kaalmada Dhaqaalaha ee hoose.

6. Isbitaalka iyo Mus'asadaha waxay (a) ka dhawrsan doonaan dadaalo kasta oo ay ku aruursanayaan qarashka Adeegyada Xaaladda degdega ah iyo Adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah (hoos lagu qeexay) lagana qaado bukaanada ka reeban in laga qaado talaabo looga aruurinaayo lacagta sida ku cad Xeerkan Daynta iyo Dayn Aruurinta ee Isbitaalka (b) waxay celin doonaan lacag kasta oo laga qaaday bukaanada helay Adeegyada Xaaladda deg dega ah iyo Adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah' iyo (c) waxayna isdhaafsan doonaan xogta caymiska bukaanada iyo u qalmidooda barnaamijyada dowladda ama Kuwa Isbitaalka.

7. Isbitaalku wuxuu, si waafaqsan Xeerka Daynta iyo Qarash Aruurinta, kordhin karaan qiimo dhimista in ka badan kuwa ku jira Xeerkaan Kaalmada Dhaqaalaha, si qof iyo xaaladiisa ah, si loo aqoonsado xaaladaha gaarka ah ee dhibaatooyinka dhaqaale.

8. Mu'asasadaha ayaa lahaan kara xeerar dheeraad ah oo la xidhiidha kaalmadaa dhaqaalaha kuwaasoo qabanaaya bukaannada helaaya adeegyada lagu baxsho Urur laguna baxsho xarun aan xariir lalahay Isbitaalka (tusaale, bukaannada adeegyadooda aan lagu mudayn Nidaamyada cogta ee Isbitaalka).

9. Ku guul daraysiga raacida habraacyada lagu qeexay dukumiintigaan waxay keeni kartaa dib u dhac ama diidista Isbitaalka ama Mus'asadaha kuu diidaan Caawimaad Dhaqaale.

## Qeexitaannada

**Cadadka Caadiyan Laga Qaado Bukaanka (AGB):** Cadadka Caadiyan Laga Qaado Bukaanka ee Adeegyada Xaaladda deg dega ah iyo Adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah ee la siiyay shaqsiyaadka leh Qorshaha Caafimaadka Gaarka ah (sida hoos lagu qeexay) ama leh caymiska Barnaamijyada Medicaid iyo Medicare.  agB waxaa lagu xisaabin doonaa ayadoo la adeegsanaayo "Qaabka Dib U raacida", si waafaqsan xeerarka 26 CFR Qaybta 1.50(r)5(b)(3)(ii)(C), waxaana si faahfaahsan loogu sharaxay Xeerkaan Kaalmada Dhaqaalaha, Qaybta ciwaankeedu yahay "Xadiyada U dagsan Qarashaadka".

© Boston Children’s Hospital, 2022 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin

**Adeegyada Degdega ah:** Adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah ee la baxiyay kadib markay timid xaalad caafimaad, mid jireed ama mid dhimirka ah, oo waxay muujinaysa astamaha, ay ku jiraan xanuun daran, taasoo keenaysa in haddii aan degdeg gurmad caafimaad loogu fidin qofka ay keeni karto sida uu cadeeyo qof aqoon caafimaad u leh xaalada in ay galinayso caafimaadka qofka ama qof kale khatar aad u wayn, naafo wayn oo gaarta shaqada jirkiisa ama naafada daran ee unug ka mid ah jirka ama qayb ama, marka ay tahay haweeneey uur leh, sida lagu qeexay qaybta 42 USC ee 1395dd(e)(1)(B).

**Tilmaamaha Fakhriga Federaalka (FPG):**: Cabirada dakhliga ee sanad kasta ay soo saarto Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha Maraykanka.

**Damiintaha**: Qof ama koox dad ah, ayna ku jiraan, si aan xadidnayn, waalidiinta bukaanka, masuuliyiinta sharciga ah iyo xubnaha kale ee qoyska, kuwaasoo qaadanaaya masuuliyada lacagta dhammaan ama qayb ahaan qarashaadka adeegyada Isbitaalka ama Ururada.

**Masuuliyada Dhaqaalaha ee Bukaanka Caymiska leh:** Dhammaan lacagaha la wadago, qaybta caymiska iyo lacagaha la jaro ee loo baahan yahay uuna bixinaayo bukaanka/Damiinka bukaanku sida ku cad Qorshaha Caafimaadka Shaqsiga ah ama Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Dadwaynaha (sida hoos lagu sheegay) kaasoo bukaanku uu ka diiwaan gashan yahay ama uu u qalmo.

**MassHealth MAGI:** Dakhliga Guud ee La balaarshay ee Wax laga badalay ee loo adeegsado go'aaminta u qalmida MassHealth, ayna ku jiraan, si aan xadidnayn, waqtiyada waafaqsan cabirida dakhliga MAGI si loo go'aansho u qalmida MassHealth.

**Adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah:** Adeegyada sida macquulka ah loo filanaayo inay ka hortagaan, baaraan, ka hortagaan kasii darista, yareeyaan, saxaan, ama daaweeyaan xaalado caafimaad oo nololsha khatar ku ah, keenaaya dhibaato ama xanuun, keenaaya cilad jireed ama naafo, keenaaya khatarta ama imaanshaha khatar naafo, ama keenaaya cudur ama daciifnimo.

**Adeegyada aan Qarashkooda laga bixin Bukaanka:** Adeegyada aan Qarashkooda laga bixin Bukaanka waxaa ku jira adeegyada (aan ugu jirin inay yihiin adeegyada ay daboolaan gunnooyinka/uqalma gunnada Qorshaha Caafimaadka Gaarka ah ee Bukaanka ama Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha, ama kaasoo uu dhaqaale ahaan masuul ka yahay bukaanku uuna siinaayo bixiyaasha adeegyada noocaas ah; (b) adeegyo ku jira kuwa gunnooyinku daboolaan/u qalma Kaalmada, laakiin la baxsho kadib marka bukaanku uu dhamaystay dhammaan gunnooyinka ku jira Qorshaha Caafimaadka Shaqsiga ah ama Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Dadwaynaha; iyo (c) adeegyo uu baxshay adeeg bixiye aan ku jirin shirkada caymiska caafimaadka/barnaamijka. Adeegyada aan Qarashkooda laga bixin Bukaanka kuma jiran Adeegyada Xaaladda deg dega ah.

**Maal galin Kale:** Waxaa ku jira khayraadka kale iyo ilaha maaliyada ee ay hayso, heli karto, ama uu ka faa'iidaysan karo, bukaanka/Damiinka bukaanku, kuwaasoo loo adeegsan karo bixinta qarashka daryeelka bukaanka, oo uu ku jiro ayadoon la xadidayn, ururada deeq bixiyaasha, lacagaha ay baxiyaan qaraabadu, saaxiibada iyo qolyo sadexaad, iyo deeqadahaayadaha (ayna

© Boston Children's Hospital, 2022 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin

ku jiraan lacagaha lagu heli karo tabarucaada dadwaynaha iyo qaababka kale ee lamidka ah ee lacag aruurinta).

**Aaga Adeegga Rasmiga ah:** Massachusetts, Connecticut, Maine, New Hampshire, Rhode Island, Vermont iyo New York, marka laga reebo aaga bartamaha New York.

**Qorshaha Caafimaadka Gaarka ah:** Waa caymiska adeegyada daryeelka caafimaadka ee lagu baxiyo caymiska caafimaadka, qorshaha caafimaadka ama daboolid kale ama qorshe kale oo kasta oo caafimaad, fayaqab ama qorshe kale, maaliyad ama haayad loo sameeyay ujeedo ah bixinta qarashka, ama haddii kale xal u helida qarashka, adeegyada daryeelka caafimaadka oo la siiyo dadka ka diiwaan gashan gudaha ama laan hoos tagta caymiskaas, qorshahaas ama barnaamijkaas.

**Barnaamijyada Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha:** Wa barnaamijyo ay abuurtay dowladda gobalka ama an Federaalka si loobaxsho qarashka ama haddii kale xal loogu helo qarashka adeegyada daryeelka caafimaadka ee caymiska ku jira/u qalma kaalmada ee la siiyo shaqsiyaadka buuxsha shuruudaha u qalmida barnaamijka. Barnaamijyada Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha waxaa ku jira, laakiin kuma koobna, MassHealth, Health Safety Net, caymisyada qiimaha jaban ee lagu baxsho Sharciga Daryeelka Qiimaha Jaban, sida caymisyada ConnectorCare, Barnaamijka Caymiska Caafimaadka Carruurta (Children's Health Insurance Program (CHIP), barnaamijyada kale ee Medicaid iyo Medicare.

## Shardiga Uqalmida Caawimaad Dhaqaale

Si ay ugu qalmaan kaalmada dhaqaale ee ku jirta Xeerkan Kaalmada Dhaqaalaha, guud ahaan, bukaannadu waa inay buuxshaan shuruudaha u qalmida ee soo socda:

1. Adeegyada la siinaayo bukaanka waa inay noqdaan adeegyo caafimaad ahaan muhiim ah;
2. Bukaanku waa inuu dagan yahay aaga Adeegga Rasmiga ah ee Isbitaalka;
3. Dakhliga Bukaanka ee MassHealth MAGI waa inuusan ka badan 400% heerka faqriga ee FPG ee tirada qoyska bukaanka;
4. Bukaanka/Damaanad qaadaha waa inuusan haysan Maaliyado Kale oo uu heli karo si uu ugu baxsho qarashadka Adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah;
5. Bukaanka/Damaanad qaadaha waa inuu la kulmaa La taliyaasha Dhaqaalaha ee Isbitaalka si ay u go'aanshaan in bukaanku u qalmo in laga qoro ama uu u qalmo caymiska Qorshaha Caafimaadka Gaarka ah ama Barnaamijyada Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha;
6. Haddii ay go'aanshaan La taliyaasha Dhaqaalaha ee Isbitaalka in bukaanku u qalmo kaalmada dhaqaale, Bukaanku/Damiinku waa inuu codsadaa caymiska ama barnaamijka noocaas ah uuna keenaa dukumiintiyada loo baahan yahay si uu ugu qalmo caymiskaas ama barnaamijkaas, ama uu u keeno dukumiintiyada La taliyaasha Dhaqaalaha ee Isbitaalka taasoo cadaynaysa in codsiga diiwaan galinta iyo dukumiintiyada u qalmida

© Boston Children's Hospital, 2022 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin

loo diray Qorsheyaasha Caafimaadka Gaarka ah, wakaaladaha dawlaa, iyo laamaha kale ee ay qusayso;

7. Inaan bukaanku ka diiwaan gashanayn/uusan u qalmin, la go'aanshay inuusan u qalmin ama caymis kasta oo noocaas ah, uusana joojin caymiska/diiwaan gelinta/u qalmida intii lagu jiray lixdankii (60) maalmood ee ugu horeeyay; iyo
8. Bukaanka/Damaanad qaadaha waa inuu buuxiya uuna diraa Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha e Isbitaalka uuna u keenaa La taliyaasha Dhaqaalaha ee Isbitaalka dhammaan dukumiintiga loogu baahan yahay codsigaas.

Haddii bukaanku ka qoran yahay ama uu u qalmo Qorshaha Caafimaadka Gaarka ah ama Barnaamij kasta oo Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha ah, kaalmada dhaqaaluhu uma furna si loo yareeyo cadadka lagu leeyahay ee la xidhiidha Adeegyada aan ahayn xaalada Degdega ah ee la siiyay bukaanka; marka la hubiyo in kaalmada dhaqaale lagu heli karo adeegyada Isbitaalka ama Ururadu u arkaan inay ka baxsan yihiin ururka sida ku cad Caymiska Qorshaha Caafimaadka Gaarka ah ama Barnaamij kasta oo Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha ah, laakiin kaliya Isbitaalka iyo/ama Ururka, sida ku haboon ayaa go'aaminaaya inaysan jirin dhakhaatiir caymiska ku jira ee qorshaha caafimaadka gaarka ah ee bukaanka/barnaamijka oo awooda bixinta daryeelka gaarka ah ee loogu baahan yahay daawaynta xaalada caafimaad ee bukaanka.

Kaalmada dhaqaalaha ayaa sidoo kale aan lagu bixin karin yaraynta cadadka uu masuulka ka yahay Bukaanka Caymiska leh. Hase yeeshee, haddii bukaanku taas badalkeed u qalmi karo kaalmada dhaqaale sida ku cad shuruudaha Xeerkaan Kaalmada Dhaqaalaha, xeerarka hoose ee la xidhiidha Cadadka Caadiyan Laga Qaado Bukaanka (AGB) ayaa la waafajin doonaa masuuliyada Dhaqaale ee Bukaanka Caymiska leh.

## Helitaanka Kaalmada Dhaqaalaha

Haddii la go'aansho in bukaanku uu buuxshay shuruudaha u qalmida ee Kaalmada dhaqaalaha sida ku cad shuruudaha Xeerkan Kaalmada Dhaqaalaha, kaalmada dhaqaale ayaa la heli karaa si loo yareeyo qiimaha Adeegyada Xaaladda deg dega ah ama Adeegyada Kale ee Caafimaad ahaan Muhiimka ah, ayadoo lagu salaynaayo Dakhliga Bukaanka ee MassHealth MAGI.  Qiimo dhimista soo socota ayaa la waafajin doonaa qarashka Adeegyada Xaaladda deg dega ah iyo Adeegyada kale ee Caafimaad ahaan Muhiimka ah, ayadoo lagu salaynaayo Dakhliga Bukaanka ee MassHealth MAGI; marka la hubiyo in kaalmada dhaqaale iyo qiimo dhimistaan aysan qusayn: (a) Qorshe Kasta oo Caafimaadka Gaarka ah ama lacago ay baxshaan qarash bixiyaal sadexaad, ayna ku jiraan, laakiin aan ku koobnayn, Barnaamijyada Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha; (b) wadarta guud ee cadadka qayb ama dhammaanteed uu Masuulka Ka yahay Bukaanku; (c) Kaalmada dowladda; (d) lacagaha lagu baxsho sheegashada daynta; (e) mid kasta iyo dhammaan Maaliyadaha Kale ee uu heli karo bukaanku/Damiinku, sida lacagaha ay baxshaan ururada khayriga ah, ilaha tabarucaada dadwaynaha, lacagaha ay isku dardaraan qoysku, saaxiibada ama qolyaha sadexaad, iwm.:

© Boston Children's Hospital, 2022 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin

| Dakhliga MassHealth MAGI | Qiima Dhimista Qarashaadka Guud |
|---|---|
| 0%-400% Heerka FPG | 100% |
| >400% Heerka FPG | 0%* |

*Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska Lahayn ayaa la heli karaa, sida ku cad Xeerka Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska Lahayn ee Isbitaalka iyo Ururada, haddii aan bukaanku caymis lahayn.

## Talo Bixinta Dhaqaalaha

1. Isbitaalku, asagoo adeegsanaaya la taliyaashiisa dhaqaalaha, wuxuu ka caawinayaa bukaannada Isbitaalka iyo Ururada, iyo damiinnadiisa, hanaanka gudbinta codsiyada barnaamijyada Kaalmada dhaqaalaha ee Isbitaalka; caymiska Caafimaadka Gaarka ah; iyo/ama Barnaamijyada Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha.

2. Bukaannada soo socda waxaa la siin doonaa adeegyada Talo Bixinta Dhaqaalaha: bukaan kasta oo (a) lagu qoray nidaamka mudaynta iyo diiwaanka Isbitaalka inuu yahay bukaan aan caymis lahayn; iyo (b) bukaan kasta oo doonaaya kaalmada dhaqaale.

   - Shaqaalaha Isbtaalka iyo Haayada ee masuulka ka ah jadwal mudaynta, diiwaan galinta, iyo biilka ayaa u sheegi doona bukaankaas iyo/ama Damiinkiisa sida ay ku helayaan Adeegyada Talo Bixinta Dhaqaalaha.

   - Boorar sheegaya helitaanka Adeegyada Talo Bixinta Dhaqaalaha iyo sida lagu heli karo adeegyadaas ayaa lagusoo dhajin doonaa baraha diiwaan galinta daryeelka bukaanka iyo goobaha kale, ayna ku jiraan, si aan xadidnayn, aaga bukaan jiifka, aaga bukaan socodka iyo goobaha waaxda isqorista/is diiwaan galinta xaalada degdega ah.

   - Foomka lacagta uu isbitaalka iyo Mus'asadaha ku leeyihiin bukaanka waxaa ku jiri doona ogaysiis muujinaaya helitaanka Adeegyada Talo Bixinta Dhaqaalaha iyo sida lagu helaayo adeegyadaas.

3. Shaqaalaha Talo Bixinta Dhaqaalaha ayaa ka caawinaaya bukaannada iyo/ama Wakiilka:

   - Codsashada ama dib u codsashada Caymiska Caafimaadka Gaarka ah, Barnaamijyada Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha, iyo/ama barnaamijyada kale ee Kaalmada dhaqaalaha ee la heli karo.

   - Waxay aqoonsanayaan ayna u gudbinayaan bukaannada ilaha kale iyo khayraadka caymiska/Kaalmada dhaqaalaha.

   - Fahanka Xeerka Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska Lahayn ee Isbitaalka iyo Ururada iyo sida loo codsado dukumiintiyadaas.

   - Xogta lagala xidhiidhaayo Waaxaha Qarashaadka ee Isbitaalka iyo Haayadaha.

La taliyaasha Dhaqaalaha ee Isbitaalku sidoo kale waxay ka caawin karaan shaqsiyaadka aan ahayn bukaannada Isbitaalka ama Ururka odsiyada Kaalmada dowladda.

© Boston Children’s Hospital, 2022 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin

## Habraacyada Kaalmada Dhaqaalaha

1. Bukaanka/Damiinka aan lahayn caymiska ama doonaaya kaalmada dhaqaale waxaa loo gudbin doonaa La taliyaha Dhaqaalaha ee Isbitaalka si loo go'aansho helitaanka ama u qalmida caymiska Qorshaha Caafimaadka Gaarka ah; Barnaamijyada Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha; ama barnaamijyada Kaalmada dhaqaalaha ee Isbitaalka.

2. Bukaannada aan u qalmin Barnaamijyada Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha ama caymiska Qorshaha Caafimaadka Gaarka ah, waxay codsan karaan kaalmada dhaqaale ayagoo buuxinaaya Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha ee Isbitaalka bixinaayana dhammaan xogta, dukumiintiyada, iyo cadaynta lagu qeexay Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha. Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha ayaa lagasoo dagsan karaa webseetka Isbitaalka waxaana sidoo kale laguugusoo diri karaa boostada ama si toos ah ayaad usoo qaadan kartaa. Faahfaahinta ku aadan sida aad ku helayso nuqul kamid ah Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha ayaa laga heli karaa qaybta Xeerkaan Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha ee ciwaankeedu yahay "Daabacaada/Helitaanka Xeerka Caawimaadda dhaqaalaha, Xeerka Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska lahayn, Xeerka Daynta iyo Aruurinta Qarashka, Xisaabinta Cadadka Guud ee Biilka La qaado." Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha waxaa la socda tilmaamaha sida aad codsiga u buuxinayso.

3. Makay jiraan xaalado gaar ah, Isbitaalka ayaa u aqoonsan kara diiwaan gelinta bukaanka qaabab lagu tijaabinaayo u qalmida Barnaamijyada Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha si qaab hordhac ah loogu xaqiijiyo u qalmida bukaanka ee kaalmada dhaqaale oo lagu siiyo adeegyo kasta oo kaalmada dhaqaalaha lagu heli karo sida ku cad Xeerkan Kaalmada Dhaqaalaha.

4. Xogta lasoo aruursho waxaa loo gayn doonaa Agaasimaha u Xilsaaran Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka si uu u go'aansho helitaanka ama u qalmida kaalmada dhaqaale sida ku cad Xeerkaan Kaalmada Dhaqaalaha.

5. Bukaannada/Damiinnada loo ogolaado inay qaataan kaalmada dhaqaale waxaa loo diri doonaa ogaysiis qoraal ah oo ka yimaada shaqaalaha Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka.

6. Go'aaminta u qalmida waxay sii shaqayn doontaa muddo dhan 12 bilood kadib taariikhda go'aaminta, waxayna qabanaysaa dhammaan adeegyada dheeraadka ah ee kaalmada dhaqaalaha lagu heli karo Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha, ilaa in Isbitaalku go'aansho maahee in bukaanku noqday mid ka diiwaan gashan ama u qalma Qorshaha Caafimaadka Gaarka ah ama caymis, ama Barnaamijyada Kaalmada Daryeelka Caafimaadka Dadwaynaha.

7. Koontooyinka ayaa wax laga badalayaa marka la helo qiimo dhimista kaalmada dhaqaalaha ee Ururka iyo Isbitaalka ay qusayso labadaba. Qimo dhimista waxaa lagu samayn doonaa qarashaadka guud.

8. Bukaannada/Damiinka waxaa kaalmada laga siin karaa fahanka Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha iyo buuxinta Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha ayagoo wacaaya La taliyaasha Dhaqaalaha oo lambarkoodu yahay (617) 355-7201 iyo/ama ayagoo kaalmada codsanaaya si shaqsi ah ama dhanka boostada oo ay u dirayaan Waaxda Talo Bixinta Dhaqaalaha ee Waaxda Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka ee Boston Children's Hospital, 300 Longwood Avenue, Boston, MA, 02115, Farley Building rooms 160.

© Boston Children's Hospital, 2022 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin

## Xadiyada U dagsan Qarashaadka

1. Bukaan kasta oo u qalma kaalmada dhaqaale oo lagu baxsho Xeerkan Kaalmada Dhaqaalaha lagama qaadi doono qarash ka badan AGB ga bukaannada caymiska leh ee Adeegyada xaaladda deg dega ah iyo Adeegyada Kale ee Caafimaad ahaan Muhiimka ah ee uu baxsho Isbitaalku. Dhammaan adeegyada kale, Xeerka Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska Lahayn ee Isbitaalka ayaa la waafajin karaa.

2. Isbitaalka ayaa xisaabinaaya AGB ga asagoo adeegsanaaya Qaabka "Dib-U raacida". Sanad miisaaniyadeed kasta, Isbitaalku wuxuu go'aamin doonaa boqoleeyda kaliya ee AGB, oo lagu xisaabsho sida ku cad Xisaabta Cadadka Caadiyan Laga Qaado Bukaanka ("Xisaabinta AGB"), si waafaqsan xeerarka 26 CFR Qaybta 1.501(r)-5(b)(3)(ii)(C).

## Bukaanada Laga Reebay in Laga Aruursho Qarashka

Si waafaqsan Xeerkooda Daynta iyo Aruurinta Daynta, Isbitaalka iyo Ururadu waxay ka reebayaan bukaanno gaar ah talaabooyinka dayn aruurinta. Bukaannada laga reebay talaabooyinka dayn aruurinta, iyo talaabooyinka Isbitaalku qaadi karo marka lacagta aan la bixin, waxaa lagu sharaxay Xeerka Daynta iyo Aruurinta Qarashka ee Isbitaalka.

## Daabacaada/U qalmida Kaalmada Dhaqaalaha iyo Xeerka Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska lahayn, Xeerka Daynta iyo Qarash Aruurinta, iyo Cadadka Caadiyan Laga Qaado Bukaanka

1. Bukaanka, Damiinnada iyo xubnaha kale ee dadwaynaha ayaa heli kara koobiga Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha, Xeerka Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska Lahayn, Xeerka Daynta iyo Aruurinta Daynta, iyo Xisaabta Cadadka Badanaa laga qaado bukaanka si bilaash ah ayagoo adeegsanaaya mid kamid ah qaababka soo socda:

    a. Daabacaada Interneetka: Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha ee Isbitaalka iyo Ururada iyo Xogta Kooban ee Luuqad Fudud ku qoran ayaa oonleen looga heli karaa barta: www.childrenshospital.org/financialassistance.

    b. Shaqsiyan: Koobiyada waraaqda ah ee (i) Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha ee Isbitaalka Ururada iyo Xogta Kooban ee Luuqada Fudud ku qoran, (ii) Cadadka Caadiyan Laga Qaado Bukaanka, (iii) Xeerka Daynta iyo Aruurinta Daynta, iyo (iv) Xeerka Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska Lahayn, ayaa laga heli karaa xarunta isbitaalka oo ku taala 300 Longwood Avenue, Boston, MA, Farley Building room 160.

    c. Iimayl ahaan: Dadwaynuhu waxay codsan karaan inay nuqulka ku helaan boostada ayagoo wacaaya Taageerada Adeegyada Macmiilka ee Dhaqaalaha Bukaanka oo laga heli karo (617)-355-3397 iyo/ama Talo Bixinta Dhaqaalaha ee Bukaanka 617-355-7201.

2. Turjumaadaha luuqadda shisheeya ee Xeerkan Kaalmada Dhaqaalaha, Xogta Luuqada Fudud eeKaalmada Dhaqaalaha, Xeerka Daynta iyo Xaruunta Qarashka, Xeerka Qiimo Dhimista

© Boston Children’s Hospital, 2022 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin

Bukaanka aan Caymiska Lahayn iyo Xisaabinta Cadadka Caadiyan Laga Qaado Bukaanka ayaa lagu heli karaa luuqado kaladuwan si loo caawiyo dadka aan si fiican u aqoon Ingiriiska.

3. Xiriirka Qadka: Isbitaalku wuxuu sameeyn doonaa dadaalo si uu ugu sheego helitaanka kaalmada dhaqaalaha dadka asagoo adeegsanaaya qaabab kala duwan.

    a. Boor ayaa lagu dhajin doonaa aagaga diiwaan galinta xogta helitaanka kaalmada dhaqaalaha.

    b. Boorarka bulshada iyo tallaabooyinka surtagalka ah ee lagu xisaabiyay soo jiidashada booqdayaasha' dareenka dadka isbitaalka yimaada ayaa  loogusoo dhajinayaa meelo kala duwan dhammaan Isbitaalka.

    c. Koobiyada Xeerka iyo/ama xogta kooban ee luuqada fudud ku qoran ayaa la siin doonaa dhammaan bukaannada midkood waqtiga diiwaan galinta ama ayadoo qayb ka ah hanaanka isbitaal ka saarida.

## Dukumiintiyada Dheeraadka ah/La xidhiidha, Xeerarka iyo Barnaamijyada

1. Xogta kooban ee Luuqada Fudud Ku qoran ee Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha
2. Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha
3. Liiska Adeeg Bixiyaasha Bixinaaya Adeegga Daryeelka degdega ah ama Adeegga kale ee Caafimaad Ahaan Muhiimka ah
4. Xisaabta Cadadka Caadiyan Laga Qaado Bukaanka
5. Xeerka Daynta iyo Aruurinta Daynta
6. Xeerka Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska Lahayn
7. BarnaamijyadaKaalmada Dhaqaalaha ee Bukaanka Caalamiga ah

## Qaybaha Dukumiintiga

| | | | |
|---|---|---|---|
| **Cinwaanka** | Xeerka KaalmadaDhaqaalaha | | |
| **Qoraayaasha** | Thomas Pellegriti, Agaasimaha Canshuurta iyo Ku dhaqanka Xeerka Dhaqaalaha | **Taariikhda uu Dhaqan galaayo** | 9/30/2016 |

© Boston Children's Hospital, 2022 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin

| | | | |
|---|---|---|---|
| **Waxaa dib u Eegay/ Saxay** | Gudoomiye ku xigeenka, Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka, Boston Children's Hospital<br>Madaxa Waaxda Dhaqaalaha, Boston Children's Hospital<br><br>Mudane. Madaxwayne Ku xigeenka Sare iyo La taliyaha Guud, Boston Children's Hospital | **Taariikhaha Dib loo Eegay/ Saxay:** | 12/7/2021<br><br>12/10/2021 |
| **La ansixiyey** | 12/20/2021<br><br>Gudigga Agaasimayaasha ee Boston Children's Hospital | **Effective Date** | 05/01/2023 |

© Boston Children's Hospital, 2022 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin